

OGAYSIISKA XUQUUQDA

Fadlan baro xuquuqdaada uu ku siiyey sharciga Washington.

Qiimayaasha Ugu Yar:

Sida sharciga Washington dhigayo, darawaladu waxay xaq u leeyihiin lacag ay ku qaataan daqiiqad, mayl, iyo safar.

Safarrada ah gudaha Magaalada Seattle, darawaladu waxay heli doonaan in ka badan \$5.62/safarka AMA \$0.64/daqiiqaddii + \$1.5/mayl, iyadoon la eegin haddii safarku ku dhammaaday gudaha Xuduudaha Magaalada ama haddii kale.

Safarrada ah dibadda Magaalada Seattle laakiin ku dhammaanaya gudaha Xuduudaha Magaalada, qiimayaasha hore loo sheegay ayaa loo isticmaalayaa qaybta safarka ee ka dhacaysa gudaha Xuduudaha Magaalada.

Dhammaan safarrada kale ee ka bilaabmaya Washington, darawaladu waxay heli doonaan in ka badan \$3.26/safarka AMA \$0.37/daqiiqaddii + \$1.27/maylkii, iyadoon la eegin haddii safarku ku dhammaaday gudaha Washington.

Dhammaan safarrada kale ee ka soo bilaabmaya dibadda Washington, qiimayaasha sare ku xusan ayaa loo isticmaali doonaa qaybta safarka ee ka dhacday gudaha xuduudaha gobolka.

Ilaalinta Baqshiishka: Darawaladu waxay sii wadi inay helaan dhammaan baqshiishkooda. Lyft isticmaali mayso baqshiish si ay u oofiso shuruudaha qiimaha ugu yar.

Baajinaha/Kansal-gareynta: Darawaladu waxay heli doonaan qiimayaasha ugu yar safarkiiba marka rakaabka ama Lyft baajiso, marka laga reebo baajinada ay sabab u tahay anshaxa/dhaqanka darawalka.

Ka goynaha/Ka-jaritaanada: Darawalada waxa waajib ku ah inay qoraal ku oggolaadaan ka goynaha/wax ka jarista mushaharkiisa (marka laga reebo haddii uu sharcigu dhigayo ama maxkamadi amartay).

Ogaysiis: Lyft waxay siin doonta darawalada macluumaadka mushaharka qaab safar kasta ah iyo qaab toddobaadle ah.

Wakhtiga Jirrada ee Mushaharka Lagu Qaato: Darawaladu waxay xaq u leeyihiin wakhtiga jirrada ee mushaharka lagu qaato, oo ku xiran waxa usii yaalay. Darawaladu waxay kaydsan 1 saac oo ka mid ah wakhtiga jirrada ee mushaharka lagu qaato 40-kii saacadood oo ay ku sugnaayeen kaabadda rakaabka ee Washington. Darawaladu waxa waajib ah inay kaydsadaan ugu yaraan 4 saacadood si ay u helaan wakhtiga jirrada ee mushaharka lagu qaato ee ay shaqaysteen. Darawaladu waxay heli wakhtiga jirrada ee mushaharka lagu qaato oo ku sar go'an celceliska sicirka saacaddii (oo lagu soosaaro lacagta aad xoogsato oo loo qaybiyey saacadaha aad cid qaadday) 12-kii bilood ee horeeyey.

Darawaladu waxay wakhtiga jirrada ee mushaharka lagu qaato u isticmaali karaan sababaha soo socda:

- Jirrada jireed ama maskaxeed, dhaawac, ama xaalad caafimaad, sida inay u baahdaan baaritaan, daryeel, ama daawayn caafimaad

- Inay daryeel siiyaan xubin qoyskooda ka mid ah oo qabta jirro jireed ama maskaxeed, dhaawac, ama xaalad caafimaad, sida inay xubinta qoysku u baahan tahay baaritaan, daryeel, ama daawayn caafimaad
- Daryeelka caafimaadka kahortagga ee adiga laftaada u baahan ama inaad daryeesho xubin qoyska ka mid ah oo u baahan daryeelka caafimaad ee kahortagga ah
- Sababaha la xiriira qalalaasaha guriga ee adiga ama xubin qoyska ah ka dhanka ah
- Sababaha la xiriira kufsi ama dabagal adiga ama xubin qoyska ah loo gaysto
- Haddii dugsiga ama goobta daryeelka ee ilmahaaga loo xiray sabab la xiriirta amar dawladeed ama sababo caafimaadka la xiriira dartood
- Muddada lagu jiro shaqo-ka-joojinta ama xaaladaha kale ee kaa horjoogsanaya inaad kaabadda ka shaqayso, iyagoo ku xiran ka reebitaanada qaar.

Magdhawga Shaqaalaha: Darawaladu waxay boostarrada ka akhrisan karaan kana daabacan karaan [halkan](#), si ay meel u dhigtaan. Iyadoo ka qayb ah barnaamijka magdhawga shaqaalaha, boqolkiiba in yar oo ka mid ah lacagta aad ka kasbato dhammaan safarrada ka qaadista ama ku dajinta Washington ayaa la hayn oo lagu bixin nidaamka, si la mid ah shaqaale kale oo kasta oo caymis kaga jira Washington.

Aargoosiga: Darawaladu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo aargoosi lagu sameeyo sababo la xiriira inay helaan xuquuqdooda ku qeexan ogaysiiskan, oo ay ku jiraan, laakiin aanan ku koobnayn, aargoosi ay sabab u tahay isticmaalidda sharciga ah ee wakhtiga jirrada ee mushaharka lagu qaato iyo xuquuqaha kale ee la xiriira fasaxa jirrada ee mushaharka lagu qaato.

Xaqa Qaadista Tallaabo Sharci ah: Darawaladu waxay xaq u leeyihiin inay raadsadaan tallaabo sharci ah ama cabasho u gudbiyaan Washington Department of Labor & Industries (Waaxda Shaqada & Warshadaha ee Washington) taasi oo la xiriirta TNC inay bixin waydo sicirrada la dammaanad qaaday ama aargoosi kula kacdo.